

# WAA WAQTIGII WAX-QABADKA

## JOOJINTA GACAN-KA-HADALKU WAA BEDBAADINTA DARYEELKA CAAFIMAADKA

RABSHADAHA KA DHANKA AH DARYEELA CAAFIMAADKA WA IN LA JOOJIYA

WAA ARRIN NOLOL IYO GEERI U DHAXEYSA




I. Griberg/ICRC

## WAXAA HADDEER DHACAYA...

Takhaatiirta, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, wadeyaasha aanbalaasyada iyo shaqaalaha daryeelka degdegga ah ayaa la weeraraa iyaga oo isku deyaaya inay nafo bedbaadiyaan. Waa loo hanjabaa, waa la xiraa ama waa la garaacaa, isbitaalladooda la dhacaa ama hub lagu duqeeyaa. Qaarkood ma shaqayn karaan, maxaa yeelay daawooyinka ayaysan gudbin karin. Qaar kalena waxaa lagu qasbaa inay naftooda la baxsadaan. Qaar kalena xataa waa la dilaa.

Xilliga colaadda, waxaa qalad ah in la weeraro shaqaalaha caafimaadka, qalabka iyo meelaha ay ka hawl-galaan iyo gaadiidkooda. Waa fal mamnuuc ku ah xeerka caalamiga ah ee aadminnimo (waxaa kaloo loo yaqaan xeerka dagaalka), maxaa yeelay dadka xanuunsan amaba dhaawaca ah ayuu u diidayaa daryeelka ay sida weyn ugu baahan yihiin.

**Hawlaha daryeelka caafimaadka oo gacan-ka-hadalka laga ilaaliyaa waa arrin nolol iyo geeri gaarsiisan!.**

## SAAMAYNTA GACAN-KA-HADALKA

Rayadka haddeerba dhibaatooyinka dagaalka la daalaa-dhacaaya, weerar lagu qaado adeegyada daryeelka caafimaadku wuxuu uga dhigan yahay:



## WAA XILLIGII WAX-QABADKA

Si ilaalinta daryeelka caafimaadku ay meelmar u noqoto, Dawladaha, ciidammada qalabka sida, adeegyada daryeelka caafimaadka iyo Ururrada Qarameedka ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas waa inay si isku-duubni ah gacan-ka-hadalka u hor-joogsadaan, tallaabana uga qaadaan.

## DAWLADAHA

Dawladuhu waxay adeegyada daryeelka caafimaadka ku bedbaadin karaan iyaga oo arrimaha hoos ku taxan ku dhaqaaqa:


- Inay sii hagaajiyaan ilaalinta sharciga ku qotonta ee bukaanka iyo shaqaalaha caafimaadka, taas oo ay ku jirto in lagu dhaqmo axdiyada caalamiga ah, lana xoojiyo sharci-dejinta maxalliga ah ee ku saabsan astaamaha laanqayrta cas iyo bisha cas iyo anshaxyada takhtarnimada;
- Inay dadweynaha iyo ciidammada qalabka sida dhexdooda ku baahiyaan wacyiga iyo aqoonta loo leeyahay xeerka caalamiga ah ee aadminnimo iyo, sidoo kale, xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;
- Inay abuuraan habab lagu diiwaan-geliyo weerarrada lagu qaado adeegyada daryeelka caafimaadka sida ururinta wararka iyo taxliilkooda;
- In baaris buuxda, degdeg ah, isla markaasna madax bannaan ay ku sameeyaan dhacdooyinka lagu hor-istaago in si nabadgelyo ah daryeelka caafimaadka loo bixiyo iyo in aan, ciqaab la'aan, weerarrada lala baxsan.

# KUWA HUBAYSAN


Xilliga colaadda, xaqa dadka dhaawaca ah iyo kuwa bukaanka ahi ay u leeyihiin daryeelka caafimaadka waxay kuwa hubaysani ku ilaalin karaan:



- In caqiidada milatariga, waxbarashada iyo tababbarkaba ay ku soo daraan tallaabooyin iyo xeer-hoosaadyo sharciga waafaqsan, si loo hubiyo in bixinta daryeelka caafimaadku aysan hakan xilliga colaadda;



- Marka ay qorshaynayaan hawlgallada milatariga ay fulinayaan, waa inay qaadaan tallaabooyin lagu ilaalinaayo dadka dhaawaca ah, kuwa xanuunsan, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, qalabka iyo meelaha ay ku shaqeeyaan iyo gaadiidkooda intaba;



- In hawl-wadeennadooda ay ku dhex-faafiyaan *Mabaadi'da Anshaxeed ee Daryeelka Caafimaadka Xilliyada Colaadda Hubaysan iyo Arrimaha kale ee Degdegga ahi ay Jiraan.*

# ADEEGYADA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Si ay u hubiyaan in shaqaalaha caafimaadku ay hawshooda u qabsadaan, kuwaanina waxay samayn karaan arrimaha hoos ku taxan:

- Inay hubiyaan inay garanayaan xuquuqdooda iyo masuuliyadaha iyaga saaran;
- Inay kordhiyaan qof waliba aqoonta uu u leeyahay *Wacyiga Mabaadi'da Anshaxeed ee Daryeelka Caafimaadka Xilliyada Colaadda Hubaysan iyo Arrimaha kale ee Degdegga ahi ay Jiraan;*
- Inay ku dhaqmaan baratakoollada iyo qorsheyaasha hawleed (contingency plans) ee ku saabsan ammaanka iyo bedbaadada shaqaalaha daryeelka caafimaadka, qalabka iyo meelaha ay ku shaqeeyaan iyo gaadiidkooda intaba;
- Inay u doodaan sidii tababbarrada meheradaha iyo koorsooyinka sarsare loogu dari lahaa xeerka caalamiga ah ee ilaaliya adeegyada daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadku xuquuqda ay leeyihiin iyo masuuliyadaha saaran;
- Inay baahiyaan doodaha cilmibaarista ku dhisan ee ka qayb-galkoodu uu furan yahay, loogana hadlaayo natiijada ka dhalata gacan-ka-hadalka lidka ku ah adeegyada daryeelka caafimaadka;
- Inay xukuumadaha ku guubaabiyaan inay samaystaan xeerar ay isla markaasna dhaqan-geliyaan; kuwaas oo lagu ilaaliyo habsami-u-socodka daryeelka caafimaadka.

## URURRADA QARAMEEDKA EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

Si nabdoon oo wax-ku-ool ah ayey u daaweyn karaan dad badan oo dhaawac ah ama bukaan ah, haddii ay:



- qaadaan tallaabooyin ay ku kordhinayaan shaqaalahooda iyo kuwa mutadawacnimada ula shaqeeya kalsoonida lagu qabo, sida lagu heli karo iyo amnigooda sida, tusaale ahaan, inay hubiyaan in qof waliba uu ilaaliyo ku-dhaqanka Mabaadi'da Asaasiga ah ee Dhaqdhaqaaqa;



- kor u qaadaan wacyiga la xiriira in si sax ah loo adeegsado astaamaha laanqayrta cas iyo bisha cas, galaangalna ay u yeeshaan sidii loo samayn lahaa shuruuc maxalli ah oo astaamahaas lagu ilaaliyo;



- uruuriyaan isla markaasna ay taxliiliyaan wararka ku saabsan dhacdooyinka gacan-ka-hadalka ee lidka ku ah sidii dareyeelka caafimaadka dadka baahida u qabaa ay si nabdoon ku heli lahaayeen.

# GACAN-KA-HADALKA WADAJIR BAAN KU JOOJIN KARNAA

## WAAN AWOODNAA INAAN JOOJINNO GACAN-KA-HADALKA LIDKA KU AH DARYEELKA CAAFIMAADKA

**2011**

**Bareeraha HCiD** – Go'aankii 5d ee ka soo baxay Shirkii Caalamiga ahaa ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ay ku kulmeeni wuxuu ICRCda ugu baaqayaa inay bilawdo wadatashiyo ay la yeelato khubarada Dawladaha, Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas (Dhaqdhaqaaqa) iyo, sidoo kale, bulsho-weynta Caalamka ee ku hawlan daryeelka caafimaadka. Wadatashiyada caynkaas ah waxaa looga jeedey inay ka soo baxaan talooyin xilliga colaadaha suuraggal ka dhigaaya in daryeelka caafimaadka dadka u baahan si nabadgelyo leh loogu gaarsiin lahaa. Halkaasna waxaa ka dhashay bareeraha ku magacaaban Daryeel Caafimaad Halis ku Jira ama HCid marka afka Ingiriiska lagu soo gaabiyo.

**2012–2014**

**La-tashiyadii Khubarada** – In ka badan 500 oo khabiir ayaa ka qayb-galay.Xubnaha Dhaqdhaqaaqa, shaqaalaha caafimaadka, saraakiisha xukuumadaha, kooxaha hubaysan, ururrada aadminnimada iyo xubnaha bulshada rayadka ah; intaas oo idil ayaa wadaagey, isla markaasna ka dooday waayo'aragnimadooda, ka dibna si wadajir ah u soo saaray talooyin helitaanka daryeelka caafimaadka ka dhigaaya wax si nabad ah lagu fulin karo.

**2015–2016**

**Ballanqaadyo Caalami ah** – Go'aankii 5d ee Disembar 2015kii lagu qaatay shirkii Caalamiga ahaa ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas iyo kii tirsigiisu ahaa 2286 ee Golaha Ammaanku uu soo saaray Meey 2016kii, waxaa labadaba lagu oggolaaday talooyinkii ka soo baxay bareerihii ku magacawnaa Daryeel Caadimaad Halis ku Jira, Dawladaha iyo jileyaasha kalena waxaa lagu guubaabiyey inay hirgeliyaan tiro go'aammo ah oo daryeelka caafimaadka lagu ilaalinaayo.

### HADDA OO LA JOOGO

Gacan-ka-hadalka waan hor-joogsan karnaa ama waxaan raadin karnaa sidii loo dhimi lahaa saamayn-tiisa. Ururro kala duwan oo daryeelka caafimaadka iyo aadminnimada ku shaqo leh ayaa isugu yimid bareeraha ku magacaaban Daryeel Caafimaad Halis ku Jira, iyaga oo isu keenay talooyin meelmar noqon kara oo xilliga colaadaha ama arrimaha kale ee degdegga ahi ay jiraan qabashada hawlaha daryeelka caafimaadka ammaan ka dhigi kara. Dawladaha, bulshada daryeelka caafimaadka iyo Dhaqdhaqaaquba waxay ballan ugu qaadeen, si heerar kala duwan ah, in talooyinkaas ay ku shaqeeyaan. Hase ahaatee, ballanqaadyadani keligood wax ku filan ma aha.


A. Synenko/ICRC

## DARYEELKA CAAFIMAADKU HALIS BUU KU JIRAA

Bareeraha ku magacaaban 'Daryeel Caafimaad Halis ku Jira' waxaa markii ugu horreysey ku tallaabsaday Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Wuxuu bareerahaasi meel isugu keenay dad ka socda dunida oo idil, kuwaas oo rumaysan in qof waliba xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad xilliga colaadaha hubaysan iyo in shaqaalaha caafimaadku ay helaan awood iyaga oo nabdoon ay hawshooda ku qaban karaan.

Waxa noogu horreeya ee noogu muhiimsani waxay tahay in aan hubinno Dawladaha iyo kooxaha hubaysan ee ka madaxa bannaani inay ilaaliyaan adeegyada daryeelka caafimaadka, si Dhaqdhaqaaqa iyo bulshada daryeelka caafimaadkuba ay u fuliyaan hawlahooda naf-bedbaadiska ah.

## WAXA ADIGUBA SAMAYN KARTO

Soo degso xirmo-qoraalka ku magacaaban Daryeelka Caafimaadka Halis ku Jira (www.healthcareindanger.org/campaign-kit/), naguna caawi sidaan dadka ugu badan ula xiriiri lahayn, si aan u baahinno oraahda ah:

**Jooji gacan-ka-hadalka waa bedbaadi daryeelka caafimaadka.**

ICRC

Ergada ICRC Soomaaliya
Wadada Denis Prit
S.B. 73226-00200
Nayroobi, Kenya
T:+254 202719 301
@ ICRC, Disembar, 2017

Naqshadda garbedka hore: W. al-Absi/ICRC

4294/402 12.2017 1000